



Waxaa loo diyaargaroobay xaggaagan in shaqo ballaaran laga qabto caafimaadka iyo nabadgelyada

Waxaan u mahadcelineynaa coddeeyaashii taageeray ballanqaadkii dhaqaale ee bishii Maayo 2017, iyada oo xaggaagani la qaban doono mashaariicdii waaweyneyd kuwaasi oo ahaa ballaanqaadkii dhaqaale ee caafimaadka iyo nabadgelyada.

Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxa ay qorsheynayaan in dhammaadka xaggaagani ay dhammaan bedelaan qasabadaha jikada iyo tuubooyinka iskuulka ee biyaha laga cabو, Intaas waxaa intaas dheer, waxaa markii u horeysay laga fulinayaan mashaariic lagu sameynayo saqafyo iska caabiyi kara haddii uu dhulgariir yimaada dugsiga Beverly Cleary(Fernwood Campus) iyo Martin Luther King Jr. Iskuuladani waxa ay sidoo kale dib u hagaajin lagu sameynayaan meelaha dadka laxaadka la'i ay ka soo galin karaan ama ka bixin karaa, waxaa lagu rakibayaan qalab cusub oo lagaga hortago marka dabku dhaco iyo kuwa dabka lagu bakhtiiyo.

Dugsiga Hoose ee Lewis waxaa lagu kordhin doonaa sidii kor loogu qaadi lahaa in uu waafaqo sharchiyada dhismaha ee ah in uu dhismuhu iska celin karo dhulgariirka ah, waxaa ku mahadsan Ganacsatada Oregon oo lacag ugu deeqday sidii dib loogu hagaajinayey iyo hay'ada horumarinta dhaqaalaha gobolka. Iskuulka Lewis wuxuu kale oo loo sameyn doonaa qalab cusub oo dabka ka diga iyo qalabkii dabka lagu daminayey, waxaa intaas dheer oo kor loo qaadayaa meelaha dadka laxaadka la'i ka soo galaan ama ka baxaan dhismaha iskuulka.

Hawsha caafimaadka iyo nabadgelyada ee laga qabanayo Dugsiga Hoose ee Chapman waxaa ka mid ah in laga saaro wixii asbestos ah oo marmarka(tiles) ku yaala sagxada iyo saqafka gurigaba oo inta badan dhismaha ku wareegsan, iyada oo lagu bedelayo sagxad cusub oo aan lahayn wax asbestos, saqaf qalab fiican leh. .

Shaqqadii dib u cusbooneysiinta ee kala gedisneyd wali way sii soconeysaa. Guddida Golaha Waxbarashada waxa ay ansixiyeen qorshaha guud ee Dugsiga Dhexe ee Kellogg iyada oo ay socoto shaqqadii dib u dumista dhismihii hore ee iskuulka. Wuxuu la qorsheeyey in Iskuulka Kellogg uu diyaar u noqdo ardayda cusub ee sanad-dugiyeedka 2021-2022. Dugsiga Sarre ee Madison sidoo kale waxaa la ansixiyeen qorshihii guud bishii Maayo. Shaqqadii naqshada ayaa socota iyada oo shaqqadii dhismuhu ay bilaabmi doonto xaggaaga sanadka 2019.

Iyada oo aay iminka ka soo wareegtay muddo sanad ah dhismihii dib u dhiska Dugsiga Sarre ee Gtant waxa ay ku socotaa si xawli ah. Xaggaagan waxaa lagu darayaa qeyb cusub oo dhinaca galbeedka dhismaha iskuulka ah. Dib u cusbooneysiinta saqafka iskuulku waxa ay dhammaan doontaa bisha Sebtambar, iyo iyada oo goobta baabuurta la dhigto ee geesta waqooyi la hagaajin doono. Dhammaan qalabkii birta iyo shubista sabada shubka iyagana waa la dhammeystiri doonaa taasi oo macnaheedu tahay in kor loo qaadayo si dhismuhu iskaga caabiyi haddii uu dhulgariir yimaado.

Waxa sidoo kale socot shaqadii laga qabanayo gudaha dhismaha ee qeybtii taariikhiga ahayd ee fasalada dhinaca kalena qeybihii biyaha,korontada iyo farsamada. Dugsiga waxa weeyaan mashruucii baaxada weynaa ee ugu dambeeyey lagu fulinayey ballanqaadkii dhaqaalihii ee sanadkii 2012, iskuulkaasi waa dib ardayda loogu furi doonaa bilowga sanad-dugsiyedka 2019-2020.

Wixii macluumaad dheeraa fadlan waxaad booqataa halkan [Shabakada Barnaamijyada Ballanqaadka Dhaqaale](#).

-David Mayne,Maamulaha Isgaarsiinta Ballanqaadka Dhaqaalah